

HANDS-FREE MINNESOTA

(Ka qaad telifoonka gacanta)

Siduu kuu saamayn karaa sharciga cusub?

Sharciga cusub ayaa u oggolaanaya darawalku inuu isticmaalo wicitaanada teleefanka gacanta si uu u sameeyo wicitaan, qoraalka, dhageysiga muusikada ama podcast-ka ama raadsado jihooyin, *laakiin kaliya amarrada codka ama taleefanka ee taabashada halka mar ah adigoon qaban telefoonka*. Xusuusnoow, hands-free muhiim uma ahan mushquul la'aanta.

Sideed u adeegsan kartaa tilifoonkaaga markaad gaariga wadid?

Teleefankaaga waa inaad gacanta ku qaban. Sidoo kale, darawalku teleefankiisa uma isticmaali karo mar kasta oo wicitaan muuqaal, muuqaal toos ah, Snapchat, ciyaar, daawasho muuqaal ama sawiro ku kaydsan teleefanka, u isticmaalida apps-ka aan hagida aheyn, akhriska qoraalada, warwareejinta ama wax ku qorista teleefanka.

Marwalba ma qaban karaa teleefankeyga?

Haa. Isticmaalka teleefanka gacanta lagu qabto waa la oggol yahay si aad u hesho gargaar degdeg ah, hadey jiraan khatar degdeg ah oo halis ku timaada nolosha iyo badbaadada, ama markii aad ku jirto gaari gargaarka degdega ah loo idmay iyadoo la qabanayo waajibaadka rasmiga ah.

Ma isticmaali karaa aalada hagida GPS-ka?

Haa. GPS iyo hababka kale ee kaliya loo isticmaal karo hagida ayaa ka reeban sharciga Hands-Free. Shaashadaha gaariga ku dhexyaalo iyo habab kale ayaa sidoo kale ka reeban. Labada xaaladoodba, hababkaan ayaa inta badan xeran marka uu gaarigu dhaqaaqaayo.

Ma sharciga cusub ayuu ka soo horjeedaa in teleefanka lagu qabto xijaabka ama qaab kale oo garbasaarka ama masarka lagu qabto teleefanka?

Teleefankoo lagu qabto masarka ama shaashka kama soo horjeedo sharciga teleefanka hands-free. Waa inuu teleefanka si amaan ah ugu jiraa si hands-free uusana si naba u xirin aragtida darawalka.

Muxuu sharciga cusubi kasoo horjeeda haddii darawalka la soo baxo teleefanka oo uu gacantiisa ku qabto inta uu qeyb uga jiro ciriiriga.

Darawalka marnaba teleefanka gacanta kuma qaban karo ilaa uu ka yahay inuu helo gargaar degdega ah, hadey jiraan khatar degdeg ah oo halis ku timaada nolosha iyo badbaadada, ama markii aad ku jirto gaari loo idmay gargaarka degdega ah iyadoo la qabanayo waajibaadka rasmiga ah.

Sharciga cusub ayaa u oggolaanaya darawalku inuu isticmaalo wicitaanada teleefanka gacanta si uu u sameeyo wicitaanada, qoraalka, dhageysiga muusikada ama podcast-ka ama raadsado jihooyin, laakiin kaliya amarrada codka ama taleefanka ee taabashada halka mar ah adigoon qaban telefoonka.



**HANDS-FREE
MINNESOTA LAW**
HandsFreeMN.org

Haddii caruurteyda ka hooseeya 18 sano ayna leeyihiin aqoonsiga darawalnimada ama shatiga goboleedka darawalnimada, ma isticmaali karaan teleefanadooda leh qaabka hands-free?

Sharciga cusub ee hands-free marna kama bedelayo ee loogu talagalay tobaneeyo jirka ka hooseeya da'diisa 18 sano jirka oo haysta sharciga darawalnimada ama shatiga goboleedka darawalnimada: ma sameyn karaan oo ma qaban karaan teleefan soo wacay intey gaariga kaxeynayaan (gacan qabasho ama hands-free).

Waxay teleefankooda ka isticmaali karaa hands-free qaabka sida soo socota:

- U isticmaalka teleefankooda qaab aalada GPS ahaan, laakin oo hands-free ah ama qaab codeed ku rakiban. Waa inay saartaan halka ay u socdaan inta aysan gaariga kaxeyn kahor. Marwalbana teleefanka gacanta kuma qaban karaan.
- Dhageysiga muusikada ama podcast-tiga oo hands-free ama qaab cod ahaa ugu rakiban waa CAADI, warwareejinta laakin hands-free meesha laga shido ama kanaalada laguma oggola sharcigan.
- Wicitaanka 911 xaalad degdeg iyadoo lagu jiro. Haddii ay jiraan wax halis degdeg ah ku ah nolosha iyo badbaadada, way isticmaali karaan teleefanka iyagoo gacanta ku qabanaya ama qaabka hands-free midkood.

Igumu qasbi karaan miyaa shaashada gaarigeyga dhexdiisa ah ama waxyaabo kale sida cunida, is hagaajinta, rabaayadaha, dadka gaariga ila saaran ama buug akhriska? Waa maxay sababta aysan iga dabooli karin?

Haa, waxaa jira waxyaabo suurogal ah oo kaa mashquulin kara marka aad gaariga kaxeynayso, laakin isticmaalka teleefanka gacanta ayaa waxay soo bandhigaya caqabad gaar ah oo adag waxaana ka hadlay sharciga hands-free. Darawalka waxaa weli laga filayaa inuu ka fogaado waxyaabaha kale ee ka mashquuliya una kaxeeyo gaariga si daryeel ku dheehan ee hoos imaanaya sharciyada taraafikada Minnesota.

Ma ciqaabaa jira?

Haa. Ganaaxa koowaad waa \$50 oo lajira gunada maxkamada ganaaxa labaad iyo kuwa dambe waa \$275 oo la jira gunada maxkamada.

Tani wadada badbaado maka dhigeysaa?

Haa, laba siyaabood. 15-kii gobolba 12 gobol oo leh sharciyada hands-free, qasaaraha dhimashada halista ah ayaa hoos uga dhacay iskucelcelis boqolkiiba 15 [Ilaha: National Safety Council and Insurance Federation (Golaha Amniga Qranka iyo Caymiska Federaalka) oo ku saleysan xogta National Highway Traffic Safety Administration (Maamulka Amniga Gaadiidka Qaranka)].

Sharcigaan wuxuu sidoo kale ka caawimaad kageesanayaa in dhaqangelinta sharciga Minnesota noqdo mid amaan ah. Waayo darawaliinta looma ogola inay teleefan ku qabsadaan gacantooda, waxay u fududahay dhaqangelinta sharciga inay arkaa sharci jebinta oo ay qaadaan tallaabo wax ku ool ah.

Iyadoo dadweynaha loo sameynayo wacyigelin iyo waxbarasho, hadafka wuxuu yahay in dadka reer Minnesota u hoggaansamaan sharciga cusub iyadoon tallaabo dhagangal ah la sameyn.



**HANDS-FREE
MINNESOTA LAW**
HandsFreeMN.org

Sida loo aado hands-free (laga yimaado raqiis loona gudbo qaali...)

- 1) Ha isticmaalin teleefankaaga markaad gaari kexeynayso. Dhig teleefankaaga meesha gacmo gashigaada aad dhigto ama gadaasha dambe ee gaariga ama kursiga dambe ama taabo qaybta in lagula soo xariira ka hortagaysa, oo ku raaxeyso gaari wadista. Waa bilaash, oo waad la yaabi!
inta jeer oo muuqaalada cusub aad ku aragtay intaad gaariga kexeynaysay.. Shirkado waaweyn oo aad u tiro badan oo guulo ka gaaray ayaa ku dabaqay nidaamyadooda lama isticmaali karo teleefan, kadib markay ula qabsadeen, shaqaalihii baa soo sheegay inay kaga farax badan yihiin ugu yaraan wax soo saarna u noqotay marka lala barbardhigo markay isticmaalayeen teleefanadooda.
- 2) Isticmaalka hal sameecad dhegaha ah oo leh maykarafoon, oo waadba hands-free tahay. Xusuusnoow, isticmaalka sameecadaha dhegaha ee labada dhegood oo isla markii ah waa sharci daro Minnesota.
- 3) Ku lamaanii teleefankaada gaariga haatan aad wadato. Haddii gaarigaa haatan jira iyo teleefankaaga ay isla hadli karaan, ku lamaanii oo aad hands-free.
- 4) Soo iibso fiilo kaabbe u ah oo ku xir jaaga sameecada dhegaha ee teleefankaaga oo ku sii rakib jaaga AUX gaarigaada. Waxaad uga shaqeysiin kartaa teleefankaaga cod ahaan ama hal taabasho oo waxaad ka dhegeysan kartaa habka dhegeysiga gaarigaada. Fiilada kaabaha ah waxaad ku soo iibsan kartaa in ka yar \$5.
- 5) Haddii gaaarigaadu weyn yahay uusan laheyn jaaga AUX ama u leeyahay midka cajada laga shido, waxaad soo iibsan kartaa adapter oo geli kara meesha cajadala la geliyo oo wuxuu u oggolaanayaa inaad ku xirto teleefankaaga toos adigoo u maraya jaaga sameecada dhegaha. Adapter-ka cajalada qiimaheedu ugu yaraan waa \$30.
- 6) Soo iibso haye aad ku qabato teleefankaaga meesha hore ee dhashka,. Waxaad isticmaali kartaa cod lagu xiray ama hab hal mar taabasho ah. kilibiska waxay noqon karaan kuwo fudud oo raqiis ah ama adag. Hubso inaad hesho mid teleefankaaga si badbaadi ah u qabta Qiimuhu waxay ku kala duwan yihiin ka yar \$5 ilaa \$50.
- 7) Waxaad soo iibsan kartaa sameecad Bluetooth ama sameecada dhegaha ah oo teleefankaaga la jirta. Waxaa jira waxyaabo badan oo kala doorashada suuqa kadib ah labaduba, dhammaan oo kuu siinaya hands-free. Qiimuhu guud ahaan wuxuu yahay mid ku kala duwan \$10 ilaa \$50



**HANDS-FREE
MINNESOTA LAW**
HandsFreeMN.org